DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 24AAD | CADADKA 9AAD | TAARIIKH: 10/09/24 | Lam. 03 |
|---|---|---|---|

# FAAFINTA RASMIGA AH

# OFFICIAL GAZETTE

# الجريدة الرسمية

## Wax ka bedelka Sharciga Nootaayada Dadweynaha Puntland

| TUSMADA | |
|---|---|
| **Qeybta 1aad** | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Wax-ka-bedelka Sharciga Nootaayada Dadweynaha Puntland** |
| **Qeybta 2aad** | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 3aad** | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 4aad** | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br><br>WAXBA MALEH |
| **Qeybta 5aad** | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br><br>WAXBA MALEH |

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتـب
الرئيـس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Sharci Lr. 003 ee 10-^ka^ September 2024, kuna saabsan Wax- ka- bedelka Sharciga Nootaayada Dadweynaha Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-^aad^ farqadiisa 16-^aad^.

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/45/2024, kuna taariikhaysan 12-^ka^ Agoosto 2024.

**Markuu Tixgeliyey:** Baahida loo qabo Wax-ka-bedelka Sharciga Nootaayada dadweynaha Puntland.

**Wuxuu soo saaray**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Wax-ka-bedelka Sharciga Nootaayada dadweynaha Puntland.

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3aad**

Dhaqangalka Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

ولاية بونتلاند الصومالية
مكتب الرئيس
Office of the President
Puntland State of Somalia

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA

ولاية بو نت لاند الصومال
مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

**Tix:-XGGW/DPL/45/2024** Garoowe, Isniin, Taariikh: - 12/08/2024

**Ku:- Madaxweynaha DPL**

**Garoowe**

**Ujeeddo:- Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Nootaayada Dadweynaha Puntland**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY:-** Qodobada **60-aad (1), 64-aad (1), 68-aad(t)** iyo **70-aad (1)** ee Dastuurka Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Qodobada **2-aad (1), 3-aad (1), 57-aad(2)** iyo **58-aad** ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/127/2023 ee July 22, 2023, kuna saabsan wax-ka-bedelka Xeerka Nootaalyada Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Baahida loo qabo Wax-ka-bedelka Iyo Kaabista Xeerka Nootaalayda Dadweynaha Puntland.

**MARKUU DHEGEYSTEY: -** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 54-aad, Fadhigiisii 13-aad ee 18.07.2024 cod gacanta tag ah ku Ansixiyeen wax-ka-bedelka Xeerka Nootaalyada Dadweynaha Puntland. Guntanka fadhiga oo ahaa (**37**) Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol (**36**) Mudane, Diidmo majirin, halka uu ka aamusay (**1**) Mudane.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Nootayada Dadweyna Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirisaaq Axmed Siciid**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND
OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

**DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**
**GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND**

# WAX-KA-BEDDELKA XEERKA NOOTAAYADA DADWEYNAHA PUNTLAND

**Garoowe, Luulyo 2024**

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Tusmada Xeerka

QODOBBO HOR-DHAC AH....................................................................1
Qodobka 1-aad ....................................................................1
Erey bixin ....................................................................1
Qodobka 2-aad....................................................................2
Magaca Xeerka....................................................................2
Qodobka 3-aad....................................................................2
Ujeeddada Xeerka ....................................................................2
Qodobka 4-aad....................................................................2
Mabaadi'da Guud ....................................................................2
Qodobka 5-aad....................................................................2
Xafiiska Diiwaangelinta Nootaayada....................................................................2
CUTUBKA 2-AAD ....................................................................3
NOOTAAYADA IYO RUQSADAHA....................................................................3
Qodobka 6-aad....................................................................3
Waajibaadka Nootaalaha ....................................................................3
Qodobka 7-aad....................................................................4
Wakiilasho Garsoor ....................................................................4
Qodobka 8-aad....................................................................4
Shuruudaha Nootaalaha ....................................................................4
Qodobka 9-aad....................................................................4
Nootaale Ajnebi....................................................................4
Qodobka 10-aad ....................................................................5
Ruqsadda Nootaalenimo....................................................................5
Qodobka 11-aad....................................................................5
Hab-Raaca Ruqsad-Bixinta Nootaayada....................................................................5



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 12-aad ........................................................................................5
Luminta Ruqsadda Nootaayaha........................................................................5
Qodobka 13-aad ........................................................................................5
Codsiga Ruqsadda Nootaalanimo ....................................................................5
Qodobka 14-aad ........................................................................................6
Ruqsad Gaar ah..........................................................................................6
Qodobka 15-aad ........................................................................................6
Ruqsad Guud .............................................................................................6
Qodobka 16-aad ........................................................................................6
Qaabka Qoraalka Nootaalaha .........................................................................6
Qodobka 17-aad..........................................................................................7
Meelmarin ..................................................................................................7
Qodobka 18-aad ........................................................................................7
Wargelin Geeri ama Guurid..............................................................................7
Qodobka 19-aad ........................................................................................7
Afka wax Lagu Qorayo ..................................................................................7
Qodobka 20-aad..........................................................................................7
Waxyaabaha Ka Reebban Sarkaalka Nootaalaha ...............................................7
Qodobka 21-aad ........................................................................................8
Sugitaan ....................................................................................................8
Qodobka 22-aad..........................................................................................8
Qoraalka Asalka ah.......................................................................................8
Qodobka 23-aad..........................................................................................8
Akhrin iyo Gudbin Qoraal ..............................................................................8
Qodobka 24-aad..........................................................................................9
Wax-Ka-Beddelka Qoraalka ............................................................................9

Qodobka 25-aad .......... 9

Hirgelinta Qoraalka Nootaalenimada .......... 9

Qodobka 26-aad .......... 9

Is-Afgarad .......... 9

Qodobka 27-aad .......... 9

Hubinta Dhinacyada .......... 9

Qodobka 28-aad .......... 9

Markhaatiyaal .......... 9

Qodobka 29-aad .......... 10

Shuruudaha Damiinka .......... 10

Qodobka 30-aad .......... 10

Saxiixa iyo Shaabadda Nootaalaha .......... 10

Qodobka 31-aad .......... 10

Wareejinta Qoraalka Nootaalaha .......... 10

Qodobka 32-aad .......... 11

Kormeer iyo Baaris .......... 11

Qodobka 33-aad .......... 11

Anshax-Marin .......... 11

CUTUBKA 3-aad .......... 11

FAL-DEMBIYEEDKA, CIQAABAHA IYO .......... 11

RAFCAANKA .......... 11

Qodobka 34-aad .......... 11

Fal-Dambiyeed .......... 11

Qodobka 35-aad .......... 12

Rafcaan .......... 12

CUTUBKA 4-aad .......... 12




XAFIISKA QAANKA GUUD'EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

QODOBO QUBANE AH ........................................................................ 12
Qodobka 36-aad ........................................................................ 12
Khidmadda kala Iibinta Adeegga iyo Cashuuraha ........................................ 12
Qodobka 37-aad ........................................................................ 13
Cashuurta Dawladda........................................................................ 13
Qodobka 38-aad........................................................................ 13
Dhowrsanaanta Xafiiska Nootaayada........................................................ 13
Qodobka 39-aad ........................................................................ 13
Tirtirid & Baabi'in Qoraal........................................................................ 13
Qodobka 40-aad........................................................................ 13
Xeer-Nidaamiye ........................................................................ 13
Qodobka 41-aad ........................................................................ 13
Burin ........................................................................ 13
Qodobka 42-aad ........................................................................ 13
Dhaqan-galka Xeerka ........................................................................ 13

# CUTUBKA 1-aad

## QODOBBO HOR-DHAC AH

### Qodobka 1-aad
### Erey bixin

Xeerkan gudihiisa haddii aan si kale loo fasirin, ereyada soo socda waxaa micnahoodu noqonayaa sidan;-

| No | Erayga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1. | **Nootaale** | Waxaa loola jeedaa sarkaal guud oo sharci-yaqaan ah oo u xilsaaran diyaarinta qoraallada iyo dukumentiyada dadka ka dhexeeya, heshiisyada ganacsiga ama wax-kala-iibsiga, la-talinta sharci iyo dhammaan arrimaha maamullada madaniga ah. |
| 2. | **Wasiir** | Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta. |
| 3. | **Wasaarad** | Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta. |
| 4. | **Shahaado Sharci** | Waxaa loola jeedaa Shahaado Shareecada iyo Qaanuunka ah ee ay bixisay Jaamacad Sharci oo Puntland laga aqoonsan yahay. |
| 5. | **Ruqsad** | Waxaa loola jeedaa aqoonsiga ama oggolaashaha Nootaayo Dadweyne ay ku hawl-gasho. |
| 6. | **Khidmad** | Waxaa loola jeedaa kharashyada laga qaadayo Nootaayo Dadweyne sida; diiwaan-gelinta, imtixaanka iyo Cusboonaysiinta Ruqsadda sanadlaha ah. |
| 7. | **Ganaax** | Waxaa loola jeedaa qiimo lacageed oo lagu xukumo ama la saaro Nootaayo Dadweyne oo khalad ka dhacay. |
| 8. | **Hakin** | Waxaa loola jeedaa shaqo-ka-joojin lagu sameeyo Nootaayo Dadweyne oo muddo kooban ah. |
| 9. | **Lumin** | Waxaa loola jeedaa in rasmi ahaan lagala noqdo ama laga tirtiro Ruqsadda Nootaayo Dadweyne. |



STATE GENERAL SOLICITOR ... DOWLADDA PUNTLAND

| | | |
|---|---|---|
| 10. | **Nootaayo** | Waxaa loola jeedaa Xafiis sharciyeed oo loogu adeego bulshada, kana shaqaysa arrimo aan muran lahayn oo caadiyan khuseeya macmiilka, hantida, waraaqaha, awoodaha qareenka, ganacsiga shisheeye iyo kan caalamiga ah. |

## Qodobka 2-aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Nootaayada Dadweynaha Puntland.

## Qodobka 3-aad
## Ujeeddada Xeerka

Ujeedooyinka Xeerkani waa: -

1. Sharciyeynta qaab-dhismeedka mihnadda Nootaayada Dadweynaha ee Puntland,
2. Hubinta sarreynta sharciga iyo xoojinta cadaaladda.
3. Nidaaminta qaabka Ruqsad-bixinta, Diiwaan-gelinta Nootaayooyinka, Anshax-marinta iyo Ruqsad-kala-noqoshada, iyadoo saldhig looga dhigayo shuruucda dalka, si kor loogu qaado hufnaanta hawlaha Nootaayada.
4. Xal u helidda khilaafyada ka dhasha hantida dadweynaha.

## Qodobka 4-aad
## Mabaadi'da Guud

Xeerkani wuxuu ku dhisan yahay Mabaadi'dan soo socota: -

1. Sarraynta sharciga sida uu qabo Dastuurka Dawlada Puntland Qodobkiisa 2-aad.
2. Suuqa xorta ah sida uu qabo Qodobka 49-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland.
3. Hufnaanta iyo helitaanka adeeg sharci oo dhammaystiran.
4. Ilaalinta iska hor-imaantinka danaha is-diidan.

## Qodobka 5-aad
## Xafiiska Diiwaangelinta Nootaayada

1. Wasaaradda Caddaaladdu waxay samaynaysaa Xafiiska Diiwaan-gelinta Nootaayada Dadweynaha Puntland.
2. Xafiisku wuxuu diiwaan-gelin karaa keliya codsadaha soo buuxiya Shuruudaha ku Xusan Qodobka 8-aad ee Xeerkan.
3. Qaab-dhismeedka Xafiiska waxaa Qaabayn doona Wasaaradda.

# CUTUBKA 2-AAD
# NOOTAAYADA IYO RUQSADAHA
## Qodobka 6-aad
## Waajibaadka Nootaalaha

Waajibaadka laga doonayo nootaaluhu waa sida hoos ku qoran: -

1. Saxiixidda iyo xoojinta diiwaannada ganacsiga sida ay tilmaamayaan Qodobada gaarka ah ee shuruucda dalka oo la xiriira arrimahaas.
2. U Soo-gudbinta Wasaaradda warbixin Lix-bilood iyo xilli kasta oo looga baahdo qoraal sababeysan.
3. Talo-bixin sharci oo uu siinayo dadka soo codsada arrimaha ku aaddan heshiisyadda, Ganacsiga, Dacwadaha Madaniga ama Ciqaabta ee ka dhalan kara heshiisyada dhinacyada dhexdooda.
4. Ka fogaanshaha iska-hor-imaadka danaha ee dhex-mari kara Nootaalaha iyo dhinacyada uu la-talinayo ama uu wakiilka ka yahay.
5. Kala wareejinta hantida sharciyeysan ee guurtada iyo ma-guurtada.
6. Qorista iyo Sharciyeynta wakaaladaha, dukumintiyada rasmiga ah ee ku saabsan arrimaha madaniga ah, kuwa ganacsiga iyo sugiddooda.
7. Diyaarinta iyo sugidda qoraallada dardaaranka, lahaanshaha isla lahaanshaha iyo wax kasta oo xeerku u banneeyo, kuna caddeeyo dhammaan taariikhda iyo magaca markhaatiyaasha goob-joogayaasha iyo cidda ay khusayso.
8. Inuu saxiixo, qoro heshiisyo aan doodi ka taagnayn oo ay ku aamineen Dhinacyadu.
9. Inuu keydiyo asalka iyo nuqulka qoraallada, xataa haddii lagu soo sameeyey dalal shisheeye.
10. Inuu saxiixo xaqiijiyana buugaagta ganacsiga sida uu qabo qaanuunka madaniga ama kan ganacsiga.
11. Inuu nuqullo ka bixiyo dukumentiga loo keensado, diiwaanka iyo buugaagta ganacsiga.
12. Inuu caddeyn ka bixiyo nolosha qof la soo weydiistey inuu noolyahay.
13. Inuu sugo ama diiwaangeliyo dukumentiga leh awood sharci oo si ikhtiyaari ah dhinacyadu u kala qorteen.
14. Sugidda kala wareejinta lahaanshaha hantida ma-guurtada iyo guurtada ah, iyadoo sida loola kala wareegayo iyo shayga lala kala wareegayo ay waafaqsan yihiin sida ay qabaan xeerarka Dawladda Puntland.
15. Inuu sameeyo caddeynta qoraalka maragga ka maqan goobta marag furka.
16. Hubinta dhammaan dukumintiyada uu kala wareejinayo inay bixiyeen canshuurihii dawladda ee ku waajibtay.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 7-aad

## Wakiilasho Garsoor

Nootaaluhu isagoo wakaalad ka haysta garsoorka wuxuu sameyn karaa: -

1. Inuu xiro ama furo isaga oo ka qaadaya diiwaanka shaabadda ama saaraya meelaha amarka lagu bixiyey, iyadoo la raacayo sharciga madaniga ama ganacsiga.
2. Inuu caddeeyo liiska tiro-koobaya hantida, iyadoo la raacayo sida uu qabo sharciga madaniga iyo kan ganacsiga iyo dhammaan wixii ku saabsan xaraashka, naadada iyo wixii kale oo looga baahdo isla goobta laga hawlgelayo ama naadada.

## Qodobka 8-aad

## Shuruudaha Nootaalaha

Waxaa nootaale noqon kara: -

1. Qofkasta oo haysta shahaado sharci ee jaamacadeed lehna Khibarad ugu yaraan hal (1) sano ah kana soo shaqeeyey hay'adaha sharciga.
2. Inuu yahay muwaadin Soomaaliyeed ama nootaale Ajnabi ah haddii ay keento baahi sharci ah, sida uu qabo Qodobka 9-aad ee xeerkan.
3. Waa in aysan da'diisu ka yareyn Shan iyo Labaatan (25) sano.
4. Waa inuu caafimaadkiisu wanaagsan yahay jir ahaan iyo maskax ahaan.
5. Waa inaan maxkamadi ku ridin xukun dembi Culus 3-dii (saddexdii) sano ee u dambaysey.
6. Waa inuu yahay qof ku sifoobey hufnaan, daacadnimo iyo aqoon, kartina u leh mihnadda nootaalenimada.
7. Waa inuu waraaq caddayn ah kasoo qaataa Maxkamadda Sare oo caddaynaysa in uusan ka shaqeyn hay'ad sharci si toos ah ama si dadban.
8. Waa inuu haystaa shahaadada caddeynta cashuur bixinta ee waqtigeedu taagan yahay oo ay bixiso Wasaaradda Maaliyaddu.
9. Waa inuu haystaa warqada dembi la'aanta (CID).

## Qodobka 9-aad

## Nootaale Ajnebi

Nootaale ajnebi ah waa ka shaqayn karaa, waana ka furan karaa xafiis nootaayanimo Puntland, haddii uu buuxiyo shuruudaha ku xusan Qodobka 8-aad.



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 10-aad

## Ruqsadda Nootaalenimo

1. Nootaaluhu si uu u socodsiiyo hawlihiisa nootaalenimo waa inuu ruqsad qoraal ah ka haystaa Wasaaradda.
2. Bixinta Ruqsadda Nootaayada waxaa awood u leh Agaasimaha Guud ee Wasaaradda marka uu hubiyo Sarkaalka buuxiya shuruudaha laga rabo.
3. Ruqsadda nootaalenimada lama siin karo: -

   b. Qof ka tirsan Shaqaalaha Dawladda ee joogtada ah.
   t. Qof ka tirsan Ciidamada Dawladda.
   j. Qof ka shaqeeya Hay'adaha Maxaliga ah ama Caalamiga ah.
   x. Qareen ku shaqaysta Mihnadda Qareennimo.

## Qodobka 11-aad

## Hab-Raaca Ruqsad-Bixinta Nootaayada

1. In la hirgeliyo dhammaan shuruudaha looga baahan yahay codsadaha Nootaayada si waafaqsan sida ku cad Qodobka 8-aad ee Xeerkan.
2. In imtixaan qiimeyn ah laga qaado codsadaha, qodobkan laguma dabakhayo dadka ku soo shaqeynayey mihnadan ugu yaraan muddo 5 (Shan) sano ah.
3. Nootaayo Dadweyne kasta waxaa loo sameynayaa diiwaan-gelin sannadle ah, iyadoo Wasaaraddu siinayso Shahaado Diiwaan-gelin & Ruqsad Aqoonsi, kadib marka uu ku guulaysto imtixaanka qiimeynta.

## Qodobka 12-aad

## Luminta Ruqsadda Nootaayaha

Nootaaluhu wuxuu ku lumin karaa Ruqsadda Nootaayenimo, haddii:

b. Uu geeriyoodo.
t. Uu ku guuldarraysto gudashada waajibaadkiisa caafimaad-darro maskax ama jir ahaaneed awgeed.
j. Uu si is-kiis ah uga kaaftoomo Gudashada shaqadiisa iyo waajibaadkeeda.
x. Uu qabto xil kale ee hay'adaha Dawladda ama hay'adaha gaarka loo leeyahay.
kh. Lagala noqdo Ruqsadda Nootaayada anshax-xumo baahsan awgeed.
d. Uu sameeyo dukuminti been abuur ah si ula kac ah waxaa lagala noqonaya ruqsadda.

## Qodobka 13-aad

## Codsiga Ruqsadda Nootaalanimo

1. Nootaaluhu marka uu codsanayo Ruqsadda Nootaayanimada waa in uu codsigiisa ku caddeeyo meesha uu doonayo in uu ka furto Xafiiska (heer Gobol ama degmo).
2. Nootaaluhu kuma furan karo labo xafiis ruqsadda nootaalenimada haddii aanay Ruqsadu ahayn Ruqsadda Guud ee lagu sheegay Qodobka 15-aad.

## Qodobka 14-aad

## Ruqsad Gaar ah

1. Waxaa jirta Ruqsad gaar ah, taasoo la siinayo nootaalaha doonaya inuu Xafiis ka furto Gobollada iyo deegaannada kala duwan ee Dawladda Puntland.
2. Habraaca qaadashada Ruqsadda gaarka ah waxay kala mid tahay ruqsadaha kale ee ku xusan Qodobka 11-aad ee xeerkan.
3. Qiimaha Ruqsadda gaarka ah ee cusub waa Saddex Boqol oo doolar ($ 300) ama Sh.So u dhigma.
4. Qofka leh nootaayo ruqsad gaar ah waxaa laga rabaa inuu buuxiyo shuruudaha nootaayanimo meel kasta oo uu ka furanayo.
5. Qiimaha cusboonaysiinta ruqsadda gaarka ah waa Boqol iyo Konton doolar ($150) ama Sh.So u dhigma.

## Qodobka 15-aad

## Ruqsad Guud

1. Waxaa jiraysa Ruqsad Guud, taasoo la siinayo nootaalaha doonaya inuu xarumo ka furto Gobollada iyo deegaanada kala duwan ee Dawladda Puntland.
2. Habraaca qaadashada Ruqsadda Guud waxay kala mid tahay ruqsadaha kale ee ku xusan Qodobka 11-aad ee xeerkan.
3. Qiimaha Ruqsadda guud waa Afar Boqol oo doolar ($400) ama Sh.So u dhigma.
4. Qofka leh nootaayo Guud waxaa laga rabaa inuu keeno qof wakiil uga ah oo shuruudaha nootaayanimo buuxshay meel kasta oo uu ka furanayo xafiis.
5. Qiimaha cusboonaysiinta ruqsadda guud waa Labo Boqol oo doolar ($200) ama Sh.So u dhigma.

## Qodobka 16-aad

## Qaabka Qoraalka Nootaalaha

Qoraalka nootaaluhu waa inuu u habeysan yahay una qoran yahay qaabkan hoos ku xusan:

1. Magaca Wasaaradda Caddaaladda Ee Dawladda Puntland.
2. Sannadka, bisha iyo maalinta iyo tixraaca diiwaanka.
3. Magaca oo saddexan iyo rugta nootaalaha.
4. Goobta iyo taariikhda dhalashada, deegaanka iyo xaaladda dhinacyada, markhaatiyada, damiinada, wakiillada iyo turjumaanada haddii ay jiraan.
5. Shey-walba iyadoo si dhab ah loo cayimayo si aan la iskugu beddelin ama si isweydaar ah la isku dhaafin.
6. Hanti ma-guurto ah waxaa la sheegayaa baaxaddeeda, nooceeda, meesha ay ku taal iyo soohdimaheeda, si loo hubiyo loona sugo jiritaanka runta ah ee isla hantidaas.
7. Hanti guurto ah waxaa la sheegayaa dhammaan tilmaamaha lagu sugi karo, tusaale ahaan baabuur iyo wixii la mid ah waxaa lagu caddeynayaa lambarka taarikada, lambarka injiinka, lambarka caqaayada.
8. Dukumintiga ganacsiga iyo qoraallada la soo dhexgeliyo ama la socda waraaqaha



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

9. Caddeynta xaqiiqda ah iyo sugnaanta dhinacyada, iyadoo loo marayo kuwa ugu dhow ama haysta kalsoonida nootaalaha.

## Qodobka 17-aad

## Meelmarin

1. Hawlaha nootaalaha ee ku cad xeerkan waxay meelmar noqonayaan haddii uu saxiixo nootaaluhu ama wakiilka nootaaluhu, magaciisuna ku qoran yahay ruqsadda ay bixisay Wasaaradda Caddaaladdu.
2. Haddii qoraallada khuseeya nootaalaha ay saxiixdo cid kale waxay noqonayaan wax kama jiraan aan sharci ahayn lana isticmaali karin.
3. Waa in nootaaluhu ka diiwaan-geliyaa dukumintiga uu saxiixay xafiiska isuduwaha Wasaaradda Cadaaladda ugu dhow ee heer Gobol.
4. Haddii uu buuxin waayo shuruudaha ku qoran farqada 2-aad dukuminitiga nootaluhu wuxuu noqonayaa mid aan sharciga waafaqsanayn.

## Qodobka 18-aad

## Wargelin Geeri ama Guurid

1. Haddii ay geeri ku timaado nootaalaha waa in ay eheledii su ku soo wargeliyaan Wasaaradda muddo aan ka badneyn 48 (Afartan iyo Siddeed) saacadood gudahood oo ka bilaabmaysa waqtiga ay ka war heleen dhimashadiisa, si loo xafido dukumintiyada xafiiska ku kaydsan.
2. Haddii Sarkaalka Nootaayadu dhinto ama ruqsadda laga qaado, nuqulka dukumintiyada Xafiiska ku kaydsan waxaa lagu wareejinayaa Xafiiska Wasaarada Cadaaladda ee heer Gobol, haddii aysan jirin Maxkamadda Rafcaanka Gobolka Xafiisku uu ka furan yahay.
3. Haddii ay ku timaado Nootaalaha duruuf maan-gal ah oo khasab ka dhigeysa in uu ka guuro goobtiisii uu shaqada ku qaban jiray waa in uu baahiyaa goobta uu u guuray, Wasaaraddana qoraal ku ogeysiiyaa muddo aan ka badnayn 5 maalmood oo shaqo.

## Qodobka 19-aad

## Afka wax Lagu Qorayo

1. Qoraalka nootaalaha waa in lagu qoraa Af-soomaali, haddii lagu qoro luuqad kale waa in loo turjumo dhinacyada aan fahmi karin ayna saxiixaan.
2. Dadka baahiyaha gaarka ah qaba oo aan waxba akhriyi karin waxaa hawsha u fulinaya wakiil ay ku kalsoon yihiin.

## Qodobka 20-aad

## Waxyaabaha Ka Reebban Sarkaalka Nootaalaha

Waxaa ka reebban Sarkaalka Nootaalaha: -

1. Inuu bixiyo sir la xiriirta qoraallada lagu aaminay in uu xafido.



STATE GENERAL SOLICITOR

2. Inuu kala wareejiyo hanti aan wadan caddaynta Lahaanshaha.
3. Inuu sameeyo caddayn lahaansho oo ay Maxkamaduhu u xil saaran yihiin.
4. Inuu diiwaan-galiyo qoraalo aanay u dhammayn dhinacyda ay khusayso.
5. Inuu diiwaan-galiyo qoraalo khuseeya Naftiisa, Aabihii, Carruurtiisa, iyo Xaaskiisa xataa hadday is-fureen.
6. Inuu Xafiiska Nootaayada la wadaajiyo cid kale sida; Meherad Ganacsi, Xafiis Qareen, NGO, IWM.
7. Inuu ka been sheego ama qariyo qiimaha hantida uu kala wareejinayo.

## Qodobka 21-aad

## Sugitaan

1. Nootaaluhu waa inuu indhihiisa ku arkaa sheyga qoraalku ka hadlayo ama lala kala wareegayo.
2. Nootaaluhu markuu dhammeeyo qoraalka waa inuu u akhriyo dhinacyada uu khuseeyo iyagoo goob-joog ah.
3. Qoraalka ka kooban bogag badan waa in ay bog kasta hoosta ka saxiixaan dhinacyadu, turjumaannadu, markhaatiyadu, damiinadu, wakiilladu iyo nootaaluhu.

## Qodobka 22-aad

## Qoraalka Asalka ah

1. In qoraalka Nootalaha ee asalka ah uu ku qoran yahay khad la akhrin karo lana tirtiri karin meel bannaanna loo samayn karin.
2. Qoraalka asalka waa in ay suulka iyo qalinba ku saxiixaan dhinacyadu, markhaatiyaashu, wakiilladu, damiinadu iyo turjumaanadu, iyadoo nootaaluhu qalin ku saxiixayo.

## Qodobka 23-aad

## Akhrin iyo Gudbin Qoraal

1. Haddii dhinacyada, wakiillada ama damiinada qaarkood aysan waxba akhriyin, waa in nootaaluhu xaaladdan ku caddeeyaa qoraalka loona akhriyaa hadalkooda la qorey.
2. Qoraalka nootaalaha waa la iskugu gudbin karaa qalabka isgaarsiinta ee muujinaya muuqaalkiisa dhabta ah iyo kaamilnimadiisa.



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 24-aad

## Wax-Ka-Beddelka Qoraalka

1. Marka loo baahdo in qoraalka wax laga saaro, wax laga beddelo ama erey uun lagu daro, inta aysan hoos ka saxiixin dhinacyadu, markhaatiyadu iyo turjumaanku, waa in loo isticmaalo habka wax tirtiridda si mar kasta loo akhrin karo.
2. Wax ku daridda iyo isku beddelka ay dhinacyadu u baahdaan inay sameeyaan, ka dib marka iyaga iyo markhaatiyadu hoos ka saxiixeen, nootaaluhu inta uusan hoos ka saxiixin qoraalka wax-ka-baddelka waa in la raaciyaa caddeyn si gaar ah loo hubiyey, waana in la isu akhriyo waxyaabaha lagu daray ama la isku beddeley lana saxiixaa.

## Qodobka 25-aad

## Hirgelinta Qoraalka Nootaalenimada

Qoraalka nootaaluhu wuxuu sharciyan ku hirgalaa kolka ay joogaan dhinacyada qoraalku khuseeyo iyo labo markhaati, haddii xeerku uusan si kale u xadidayn, in ay joogaan labo markhaanti shardi uma aha dhammaan qoraallada nootaalaha ee macluumaadka caamka ah, sida dukumintiga la tasdiiqiyo ama kuwa la isku wareejiyo sida jeegagga oo kale iyo wixii la mid ah.

## Qodobka 26-aad

## Is-Afgarad

Dhinacyada wax qori kara, akhriyi karana waxay awood u leeyihiin in ay si wadajir ah isku af- gartaan kana maarmaan labada markhaati ee looga baahan yahay qoraalka nootaalaha, nootaaluhu waa inuu bilowga qoraalka si cad ugu xusaa is-af-garadka dhinacyada.

## Qodobka 27-aad

## Hubinta Dhinacyada

Nootaaluhu waa inuu shakhsiyan hubiyaa jiritaanka qof ahaaneed ee dhinacyada. Haddii taas la waayo waxaa u bannaan nootaalaha inuu adeegsado labo qof oo uu ku kalsoon yahay inay hubiyaan, kuwaas oo noqon kara markhaatiyaal.

## Qodobka 28-aad

## Markhaatiyaal

1. Qofka Markhaatiga ka noqonaya qoraalka nootaalaha waa inuu qaan-gaar yahay, ha ahaado muwaadin ama ajnabi deggan Puntland.

2. Waa in ay u dhan yihiin dhammaan xuquuqda qawaaniintu siineyso qofka muwaadinka ah iyo kan ajnabiga ah.
3. Markhaatigu waa in uusan wax masaaliix ama dan gaar ah ka lahayn qoraalka nootaalaha.
4. Markhaati ma noqon karo indhoole, dhegoole iyo aamusane aan hadli karin iyo dadka ku xusan qodobka 19-aad faqrada 2-aad ee xeerkan iyo kuwa xiriirka qaraabonimo la leh nootaalaha iyo kuwa aan aqoonta u lahayn waxay hoos ka saxiixayaan.
5. Shuruudaha laga rabo markhaatiyada ee faqradaha hore ku xusan inta ka baxsan waxaa sal-dhig u noqonaya shuruudaha ku xusan shareecada islaamka iyo xeerarka kale ee dalku leeyahay.

## Qodobka 29-aad
## Shuruudaha Damiinka

1. Qofka wax damiinanaya waa inuu keeno aqoonsigiisa.
2. Qofka wax damiinanaya waa inuu lahaada hanti ma-guurto ah oo ku taala meesha uu damiinka ku galayo ama waa inuu haysto caddayn lahaansho hanti ma guurto ah uu ku leeyahay dalka gudihiisa ama waa inu keena dhaq-dhaqaaqa xisaabaadkiisa oo nuqul ah.

## Qodobka 30-aad
## Saxiixa iyo Shaabadda Nootaalaha

1. Dukumintiyada waxaa loo aqoonsanayaa sharci marka uu saxiixo sarkaalka ruqsadda u haysta.
2. Nootaaluhu waa inuu isticmaalaa hal shaabad oo kaliya oo ay ku caddahay Astaanta Nootaayada iyo lambarka taxanaha ay ruqsaddu ku soo baxday.
3. Haddii ay Nootaayo ka lunto shaabaddu ama ay doonayso in ay wax ka beddesho shaabaddeeda, waa in ay marka hore oggolaansho ka hesho Wasaaradda.
4. Wasaaradda Cadaaladdu waa inay nuqul ka samaysaa diiwaanka shaabbad kasta oo nootaalayaashu adeegsadaan, sidoo kale waa in marka la diiwaan-galinayo nootaayooyinka ay Wasaaraddu u samaysaa lambar taxane ah.
5. Nootaaluhu waa inuu geeyaa nuqul dukuminti kasta oo uu qoray xafiiska isuduwaha Wasaaradda caddaaladda ugu dhow bishii hal-mar.

## Qodobka 31-aad
## Wareejinta Qoraalka Nootaalaha

Nootaaluhu wuxuu ku wareejin karaa qoraalka oo dhammeystiran dhinaca uu khuseeyo, kadib marka uu hubiyo in la bixiyey dhammaan cashuurtii dawladda ee ku waajibtay qoraalkaas.

## Qodobka 32-aad

## Kormeer iyo Baaris

1. Wasaaradda Caddaaladdu waxay kormeer ku samaynaysaa Xafiis Nootaale kasta, si loo hubiyo habsami u-socodsiinta adeegga dadweynaha, dhammeystirnaanta qoraallada iyo diiwaannada xafiiska nootaalaha.
2. Qaadista Cashuurta iibka waxaa ka wada shaqaynaya Wasaaradda Maaliyadda iyo Nootaalaha, iyadoo la raacayo Xeerka Cashuuraha Berriga.
3. Baarista hantida dawladda ee ka soo xeroota xafiisyada nootaayooyinka waxaa u xilsaaran Hanti-dhowrka Guud ee Dawladda Puntland.
4. Kormeerku wuxuu noqonayaa lixdii biloodba mar.

## Qodobka 33-aad

## Anshax-Marin

1. Haddii nootaaluhu galo gef la xiriira habsami-u-socodsiinta shaqada nootaayanimada, waxaa Guddiga Anshaxa oo ka kooban shan 5 xubnood oo kala ah; laba xubnood oo Wasaaradda Caddaaladda ah oo mid noqonayo Guddoomiyaha Guddiga, Xubin Wasaaradda Maaliyadda ah, Xubin Xafiiska Garyaqaanka Guud ah iyo Xubin Ururka Nootaayooyinka Puntland.
   ku anshax-marin karaan in.
   b. Digniin qoraal ah la siiyo nootaalaha.
   t. La ganaaxo, iyadoo lagu saleynayo ganaaxa hadba culeyska uu leeyahay gefka uu galay.
   j. Shaqada laga joojiyo nootaalaha muddo aan ka badneyn Lix bilood.
   x. Ruqsadda nootaalenimada lagala noqdo.
2. Go'aanka kala noqoshada Ruqsadda Nootaalenimada ee ku xusan faqradda 1-aad xarafka (x) ee isla qodobkan waxaa soo saaraya Agaasimaha Guud.

## CUTUBKA 3-aad

## FAL-DEMBIYEEDKA, CIQAABAHA IYO RAFCAANKA

## Qodobka 34-aad

## Fal-Dambiyeed

1. Nootaale kasta oo gala mid ama ka badan fal-dembiyeedyada hoos ku xusan si ula kac ah wuxuu galay dembi: -
   b. Haddii uu yareeyo ama qariyo qiimaha hantida lagula kala wareegayo ujeeddaduna tahay in cashuurta dawladdu yaraato, wuxuu gelayaa dembi, wuxuuna muteysanayaa ciqaab dhan saddex sano ilaa toban sano



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

oo xarig ah iyo ganaax aan ka yarayn kun doolar ($1,000) ama Sh.So u dhigma iyo ciqaabaha kale ee ku xusan Shuruucda Maaliyadda Puntland.

t. Haddii uu faafiyo ama iibsado Dukumintiyada ama qoraallada Dadweynaha, taasoo dhibaato ku keeni karta dhinacyada, wuxuu mutaysanayaa ciqaab dhan saddex sano ilaa toban sano oo xarig ah iyo ganaax aan ka yarayn kun doolar ($ 1,000) ama Sh. So u dhigma.

j. Haddii uu sameeyo qoraallo ama Dukumintiyo been-abuur ah, wuxuu mutaysanayaa ciqaab dhan hal sano ilaa sideed sano oo xarig ah.

x. Haddii uu qabto qoraallada laga mamnuucay ee ku xusan Qodobka 20-aad, wuxuu mutaysanayaa ganaax lacageed oo u dhexeeya labo boqol ilaa Shan boqol oo Doolar ($200 – 500) ama Sh.So u dhigma, ama shaqo-ka-joojin muddo kooban oo aan ka badnayn saddex bilood ama labadaba, haddii xad-gudubku culus yahay, haddii falkaas xad-gudub uu soo noqdo markale, wuxuu keeni karaa in Nootaayada ruqsadda lagala noqdo, isla markaana laga tirtiro diiwaanka guud ee nootaayooyinka dadweynaha.

2. Haddii ay ku caddaato Nootaayaha mar kale in uu galay dembiga lagu xukumay sida ku xusan faqrada (4) ee Qodobkan waxaa lagala noqonayaa Ruqsadda Nootaayonimo.
3. Nootaalaha lagu rido go'aan anshax-marin ah ah oo la xiriira shaqadiisa wuxuu luminayaa xaqa lahaanshaha ruqsadda nootaalenimada.
4. Macmiilka ay ku caddaato inuu bixiyey in ka yar cashuurtii ku waajibtay oo la xiriirtay kala wareejinta hantida, wuxuu bixinayaa cashuurtii dawladda oo uu qariyey iyo ganaax dhan 5% cashuurta ku baaqatay.

## Qodobka 35-aad
## Rafcaan

1. Go'aannada Anshax-marinta ee Guddiga Anshax-marintu waa go'aan Maamul.
2. Waxay Nootaayadu xaq u leedahay in ay Rafcaan uga qaato Maxkamadda awoodda u leh rafcaankeeda.
3. Muddada Racfaan qaadashadu waa soddon (30) maalmood gudahood oo ka bilaabmata maalinta Nootaayada la gaarsiiyey go'aanka anshax marinta.
4. Haddii Rafcaan loo qaadan waayo Maxkamadda awoodda u leh go'aanku wuxuu noqonayaa mid dhaqan-gal ah.

# CUTUBKA 4-aad
# QODOBO QUBANE AH

## Qodobka 36-aad
## Khidmadda kala Iibinta Adeegga iyo Cashuuraha

1. Nootaaluhu wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo khidmad adeeg, waxaana caddeynaya khidmadda uu qaadanayo Xeerka Ajuurooyinka.
2. Haddii Nootaaluhu ka baxo qoraalka uu khidmaddiisa qaatay sabab la'aan waa in uu u celiyaa khidmaddii uu hore u qaatay, haddiise macaamiishu ka baxaan

heshiiskii nootaalaha xaq looguma leh khidmad celin, heshiiskaasina wuxuu noqonayaa ansax.

3. Qoraalka kala wareejinta hantida uu sameynayo nootaaluhu waxaa ku waajibaya cashuur dawladeed.
4. Qiimaha khidmadda adeegga nootaalaha iyo canshuurta dawladda ee ku waajibtay qoraallka kasta uu sameeyo nootaaluhu waxaa lagu qeexayaa xeer gaar ah.

## Qodobka 37-aad
## Cashuurta Dawladda

Dhammaan cashuuraha waxaa lugu shubayaa Wasaaradda Maaliyadda ee Dawladda Puntland, iyadoo caddeyn la siinayo cashuur bixiyaha.

## Qodobka 38-aad
## Dhowrsanaanta Xafiiska Nootaayada

1) Lama xayiri karo lamana baari karo Xafiiska nootaayada, haddii aan oggolaansho laga helin Wasaaradda Caddaaladda.
2) Xafiiska Nootaayada laguma laha Cashuur Laysan ganacsi, Sarkaalka Nootaayadu wuxuu bixinayaa ruqsad sanadeed.

## Qodobka 39-aad
## Tirtirid & Baabi'in Qoraal

1) Sarkaalka nootaayadu xaq buu u leeyahay in uu tirtiro ama ku wargeliyo hay'adaha sharciga qoraal kasta oo uu ogaado in lagu khiyaameeyey.
2) Qoraalka la tirtiray waxaa waajib ah in qoraal ahaan lagu ogeysiiyo dhinacyadii uu dhexmaray iyo xafiisyadii uu gaaray waxtar la'aantiisu.

## Qodobka 40-aad
## Xeer-Nidaamiye

Wasaaraddu waxay awood u leedahay in ay soo saarto xeer nidaamiye, wareegtooyin, hageyaal iyo tilmaamo wax lagu saxayo laguna toosinayo oo aan ka hor imanayn Qodobada Xeerkan.

## Qodobka 41-aad
## Burin

Waxaa la buriyey Xeer kasta oo ka hor-imanaya ama aan la socon karin xeerkan.

## Qodobka 42-aad
## Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqangalayaa marka Golaha Wakiilladu Ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.